

WAXA LA SAMEEYO KADIB MARKUU SANNAD DUGSIYEEKU DHAMAADO

Kaarkaaga ORCA ayaa weli faa'iido leh ka dib marka sannad dugsiiyee ku dhamaado!

Waa kuwan waxa aad u baahan tahay inaad ogaato:

Hayso kaadhkaaga: Kaarkaagu wuu shaqayn doonaa ilaa Agoosto 31, 2026.

Ku dar lacag ka dib markuu dhaco: Kadib Agoosto 2026, waad sii wadan kartaa isticmaalka kaarkaada, laakiin waxaad u baahan doontaa inaad ku shubato lacagtaada. Waxaad tan ku samayn kartaa xafiiska Adeegga Macmiilka ee Degmada King ama onlineka MyORCA.com.

Qaado kaar cusub, haddii uu u qalmo: Haddii ilmahaagu ka diiwaangashan yahay Barnaamijka Dugsiga Barbaarinta ee Seattle (SPP) labadaba sannad dugsiiyee 2024-2025 iyo 2025-2026, waxaanu si toos ah kuugu soo diri doonaa kaarka ORCA ee cusub.

Haddii aad ka welwelsan tahay bixinta kharashka gaadiidka ka dib marka kaadhkaagu dhaco, ka fiirso fursadaha qiima dhimista ee Degmada King Metro's website: kingcounty.gov/WhichORCAFare. Waxaan halkaan u joognaa inaan taageerno baahida safarka goyskaaga!

KAARKAYGII WAA IGA LUMAY MAXAAN SAMEEYAA?

Haddii kaadhkaagu kaa lumo, ha welwelin! Si aad u codsato kaarka beddelka, waxaad awooda labo midkood:

- Noogu soo dir e-mailka DOT_TAP@seattle.gov, ama
- Naga soo wac ama qoraal noogu soo dir 206-256-6722

Kaliya noo sheeg magacaaga iyo ciwaanka boostada meesha aan kuugu so dirayno kaarkaaga cusub.

MUHIIM: Haddii aad hesho kaadhkaagii hore ka dib markaad codsato mid cusub, ma awoodid inaad isticmaasho kii hore.

8.2025

BARNAAMIJKA TAAGEERADA GAADIIDKA EE WAXBARASHADA DUGSIGA KA HOR



Seattle
Department of
Transportation

SOMALI

WAA MAXAY BARNAAMIJKA TAAGEERADA GAADIIDKA EE WAXBARASHADA DUGSIGA KA HOR?

Waxaad Gaadiidka Seattle (SDOT) waxay ogtahay ingeynta ilmahaaga ee dugsiga barbaarintu ay noqon karto caqabad! Si aan adiga kuugu fududeyno, waxaan dhamaan qoysaska u qalma dakhliga u soo direynaa kaarka ORCA oo bilaash ah, oo isticmaalkiisu aanu xadidneyn si ay u isticmaalaan sanad dugsiiyeedkan. Waxaan rajeyneynaa in kaadhkani uu kaa caawin doono sidii aad u geyn lahayd ama uga keeni lahayd ardaygaaga dugsiga barbaarinta. Dheefta kaadhka ORCA waxa lagu bixiyaa Cabbirka Gaadiidka Seattle kaas oo ah lix sano, cashuurta iibka ee codbixiyuhu ogolaaday.

WAA KAN SIDA AY U SHAQEYSO!

Waad awoodaa:

- Qaado hal kaarka ORCA ah, xitaa haddii uu guriga kuu joogo wax ka badan hal arday oo dhigata dugsiga barbaarinta.
- Isticmaal kaarka ORCA si aad ugu raacdo raacid aan xadidnayn dhammaan gaadiidka dadweynaha ee gobolka oo dhan bilaash. Isticmaal kaarkaaga ORCA ilaa Agoosto 31, 2026.
- Isticmaal kaarka 24 saacadood maalintii, 7 maalmood usbuucii.

Ardayda dugsiga barbaarinta iyo dhalinyarada 18 iyo ka yar waxay ku raaci karaan gaadiidka bilaash. Haddii aad u baahan tahay kaadhka ORCA ee bilaashka ah ee dhalintaada, booqo [FreeTransitPass.com](https://www.freetransitpass.com) si aad mid u hesho. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad hesho kaararka ORCA ee carruurta da'doodu tahay 13-18.

SIDA LOO ISTICMAALO KAARKAAGA CUSUB EE ORCA

Raacitaanka Baska

1. Ku aadi kaarkaaga ORCA akhristaha kaarka kadib markaad baska fuusho.
2. Jiid xadhigga jaalaha ah ka hor joogsigaaga si aad u ogeysiiso darawalka inaad rabto inaad baska ka degto.

Raacista Streetcar

1. Ku aadi kaarkaaga ORCA Akhristaha Streetcar ka hor intaadan fuulin.
2. Riix xariijinta codsiga joogsiga si aad u ogeysiiso darawalka inaad rabto inaad baxdo.

Raacista Tareenka Fudud

Taabsii kaarka ORCA akhristaha Trainka ka hor intaadan raacin tareenka.

XAGGEE U ISTICMAALI KARAA KAARKAYGA ORCA?

Waxaad u isticmaali kartaa kaarkaaga inaad ku bixiso kharashka:

- Basaska Degmada King - oo ay ku jiraan Access iyo Metro Flex
- Doonta Tagsiga Biyaha ee King County
- Tareenka Seattle Streetcar
- Trainka Monorail ee Seattle Center
- Sound Transit (Trainka fudud, tareenada, iyo basaska)
- Gaadiidka Bulshada
- Gaadiidka Pierce
- Gaadiidka Kitsap (baska iyo doonta dheeraysa)
- Gaadiidka Everett

Fiiri agabkan waxtarka leh ee isticmaalka gaadiidka!

One Bus Away: Soo deji app-kan si aad u hesho macluumaadka imaanshaha wakhtiga dhabta ah ee basaska iyo tareenka fudud.

Khariidadaha Google: Isticmaal Khariidadaha Google-ka kumbuyuutarka ama abka talefoonka si aad u hesho tilmaamaha safarka iyo macluumaadka imaanshaha ee wakhtiga-dhabta ah.

Qorsheeyaha safarka ee King County: Isticmaal mareegtadan (boggan) si'aad u hesho tilmaan safarkaaga tripplanner.kingcounty.gov/

